

Xeerka Xaadirista

Muhiim ayay u tahay sii wadista adeegyada in macaamiishu si joogto ah uga qaybgalaan kulannadooda baxnaaninta. NYFS ayaa codsanaysa in dhammaan macaamiishu ay baajiyaan balamahooda 24 saac kahor marka ay suuragal tahay. Macaamiisha ayaa markaas kadib la xiriiri kara shaqaalaheena si ay dib ugu dhigaan balamaha la baajiyay. Fadlan ogoow xadidaadaha soo socda:

Haddii aad Ku jirto Adeegyada Bukaanku ama Baxnaaninta Dugsiga Lagu baxsho:

- Haddii aad ka maqnaato (ama aadan imaan aadana soo wicin), dhakhtarkaaga ayaa arintaan u aqoonsan kara dhibaato caafimaad.
- Haddii aad ka maqnaato **sadex balamood sideed kulan gudahood**, galkaaga ayaa la xiri doonaa, dhakhtarkaaga ayaa kuu gudbin kara daryeel kale ama waxaad dooran kartaa inaad kusoo laabato diiwaanka sugteyaasha rugta caafimaadka/dugsiga ku salaysan ee NYFS ilaa dhakhtarka la heli karo markale.
- Xarunta caafimaadka bukaanku socodka, baajinta lalaso daahay (ogeysiis la baxsha wax kayar 24 saac kahor) ayaa loo aqoonsan doonaa balan loo ganbiyay.

Haddii aad Ku jirto Daawaynta maalintii ee NYFS:

- Kadib marka aad **sadex jeer maqnaato adoon ogeysiis bixin**, kulanka caqabada ayaa la qaban karaa si xal loogu raadsho arimaha caafimaadka ayadoo uu kasoo qaybgalaayo waalid/masuul kadibna qorshe ayaa la abuuri doonaa si loo kordhiyo ka qaybgalkaaga adeegyada.
- Haddii ilmahaagu uusan awoodin inuu si joogto ah uga qaybgalo barnaamijka kadib kulankaan, wuxuu lumin doonaa booskiisa barnaamijka adeegyo kale ayaana loo gudbin karaa.

Soo daahida:

Si loo baxsho adeegga ugu haboon ee macquulka ah, NYFS ayaa mudaysa balamaha maalin iyo waqti gaar ah. Waxaan filaynaa inaad samayso dedaal kasta si aad u timaado balamahaaga aadna uga qaybgasho watiga la mudeeyay.

Fadlan ogoow:

- Haddii aad soo daahdo 15 daqiiqo ama ka badan, ma jirto damaanad ah inaad arki doonto dhakhtarkaaga.
- Kuma qaabili doono dhakhtarkaagu haddii aad soo daahdo 25 daqiiqo.

Magaca Qoran

Taariikhda

Saxiixa Bukaanka ama Wakiilka Gaarka ah

Xiriirka Wakiilka

Magaca Qoran

Taariikhda

Saxiixa Ilmaha